

Sidee uga hortagi karnaa xatooyada, kharribaada iyo qaska ka jira dukaamada iyo maqaayadaha ku yaala degmada Laxå?

"waqtiga dugsiga lagu jiro lama oggola in laga baxo dhismaha dugsiga. Taas macnaheedu waa in ardayda aanay tegi karin maqaayadaha ama dukaamada marka weli lagu jiro xilli dugsiiyeedka, markaas dugsiga ayaa la joogaayaa. Tani waxaa kale oo ay khuseysaa waqtiyada nasashada lagu jiro iyo saacadaha casharada u dhexeeya.

Dhibaatooyinka kala duwan ee ka jira dukaamada iyo maqaayadaha daraadood xilliyada dugsiga, waxaan waalidiinta ka codsaneynaa inay la hadlaan ilmahooda si arrintaan loo raaco, si aan uga hortagno kharribaada iyo dhibaatooyinka inay degmada soo gaarto. Sidoo kale eeg macluumaadka ku lifaaqan ee ka yimid ganacsatada."

Mikael Johansson & Annemo Johansson
Centralskolan

"Haddaanu nahay Dollarstore waxaan rabnaa inaa kala hadashaan ilmihiiina muhiimadda ay leedahay habka logu dhaqmo dukaanka gudahiisa. Hadda dukaanka waxaa loo isticmaalaa sidii garoon ciyaareed oo kale. Alaabta dhulka ayaa lagu tuuraa waana laysku tuuryeyaa. Nacnacyada caanka ah meel ayaa lagu qariyaa si hadhoow markale loo soo noqdo oo loo iibsado halkii qof kale uu heli lahaa fursad uu ku iibsado. Waxaa kaloo jira xoogaa kharribaad ah, halkaasoo badeecooyin tiro badan lagu burburiyo. Tani waxay mustaqbalka fog horseedi kartaa kor u kaca qarashka macaamiisha sababtoo ah waxaan u baahannahay inaan waqti badan ku bixino ilaalinta iyo nadiifinta dukaanka meshaan macaamiisha ugu adeegi lahayn "

Erika
Dollarstore

"Burger King dhibka ugu weyni waa dhalinyarada buuqa badan ee qalqal gelinaaya martida kale. Waa dad qallafsan, wax tix gelin ah ma muujiyaan, shaqaalahana ma ixtiraamaan. Waxaa kaloo jira tuuganimu iyo wax burburin.

Waxaan codsaneyno waa in waalidiinta ilmahooda kala hadlaan marka ay maqribadii maqanyihiin waxa ay sameeyaan, cidda ay la socdaan iyo jawiga siduu ahaa. Maxaa dhici kara haddii wax la xado iyo cawaaqib xumada ka dhalan karta. Waxaa kaloo tilmaamayaa inaa nahay dhalinyarada shaqa bixiyahooda mustaqbalka."

Jimmy
Burger King

Dhamaanteen dukaanleyda iyo milkiileyaasha shirkadaha waxaan rabnaa in dhalinyarada degmada arrimahoodu u hagaagaan. Xilliga gu'ga waxaan booqanaa dugsiga iyo xarunta xilli faraaqada si aan uga wada hadalno waxa aan wadajir ku gaari karno si loo kordhiyo sama qabka iyo amnigaba!

XOOGAGGA WADAJIRA

Sababta kor ku xusan daraadeed dukaamada, oo ay weheliyaan dugsiga iyo BRÅ waxay waalidiinta u diyaariyeen macluumaadka ku xusan waraaqdaan si loo helo helo wada shaqeyn iyo tallaabo qaadis wadajira. Tani waxay daryeel u tahay wadajir ilmahaaga iyo dhalinyaradeena.

BRÅ MAXAY TAHAY?

BRÅ (Golaha ka hortagga dembiyada) wuxuu la kulmaa isku duwaha amniga degmada iyo hogaamiyaha xarunta xilli faraaqada kuwaas oo leh hawgal wada jir ah oo ku saabsan ka hortagga ANDTS (khamriga, maandooriyaha, mirqaansiinta, tubaakada iyo qamaarka) BRÅ waxaa kale oo ku jira madxa IFO ee degmada (daryeelka qofka iyo qoyska) iyo sidoo kale horumariyaha ganacsiga iyo booliska.

Kooxda waxay kulmaan dhowr goor sanadkii si ay u wada shaqeeyaan oo ay sawir guud uga qaataan xaalada ku saabsan dembiyada.

BRÅ waxay leedahay sawir bartilmaameed ah oo ku jira qorshe hawleedkeeda: "makaan siino dhamaan caruurta ku koreysa degmada Laxå bilow wanaagsan oo xagga nololaha ah xadiidno inay galaan dembiyada oo aan ka shaqeyno abuurista tallabooyin xagga badbaadada ah kolkaa waxaan abuuray bulsho bed qabta oo ay wanaagsan tahay in lagu dhex noolaado."

Degmada Laxå, Dollarstore, dukaanka Ica, Coop iyo Burger King ee Laxå nooc walba oo kharribaad iyo xatooyo ah waxay dacwad ugu gudbinaayaan booliska iyo/ama xafiiska adeega bulshada.